

Ka-dhaafitaanada HUD ee Xaaladda Degdega ah ee Cudurka COVID-19

Soo-koobista Degganaha/Kaqeybqaataha

Guji halkan si aad u aragto qoraalada buuxa ee ka-dhaafitaanada HUD ay hirgelisay Home Forward

- 1. PH iyo HCV-2: Dakhliga iyo Tirada Qoyska - Dib-u-hubinnada Sanadlaha ah ee Dib-u-dhacay** - Haddii Deggane ama Kaqeybqaate dib-u-eegis laga filayo, Home Forward ayaa ka shaqeyn doonta inay ku dhammaystirto jadwalka caadiga ah. Haddii ay jirto sabab la xiriirta COVID oo aysan suurtagal aheyn, dib-u-eegista dib ayaa loo dhigi karaa.
- 2. PH iyo HCV-3 Xaqiijinta Dib-u-hubinnada Sanadlaha ee Dakhliga** - Haddii degganeyaasha iyo kaqeybqaateyaasha ay sameeyaan dib-u-hubin caadi ah oo la filayo ayna awoodi waayaan inay helaan dukumintiyada dhinacyada saddexaad ee dakhliga, Home Forward waxaa laga yaabaa inay isticmaasho xaqiijin iskeed ah beddelkeeda.
- 3. PH iyo HCV-4: Dib-u-hubinnada Kumeelgaarka ah** - Haddii degganeyaasha ama kaqeybqaateyaasha rabaan inay ka baaraandegaan dib-u-hubin kumeelgaar ah (sida dhimis dakhli) ayna awoodi waayaan inay soo qaadaan dukumintiyada dhinacyada saddexaad ee dakhliga, Home Forward waxaa laga yaabaa inay u isticmaasho xaqiijin iskeed ah dakhliga beddelkeeda.
- 4. PH iyo HCV-6: Heshiiska Kaqeybqaadashada ee FSS** - Hadduu qoys ku jira barnaamijka GOALS qabo dhibaato la xiriirta COVID taasoo saameysa kaqeybqaadashadiisa, wuxuu awoodi doonaa inuu ku sii jiro barnaamijka ilaa labo sano oo dheeraad ah.
- 5. HQS-1: Kormeerka Bilowga ah** - Home Forward guud ahaan ma u soo diri doonto kormeereyaal ku sameeya baaritaano duddooyinka la deggan yahay. Hadduu kaqeybqaate horaan ugu noolaa duddada marka kormeerka bilowga ah la filayo, Kireeyaha ayaa sameyn doonna xaqiijin iskiis ah oo dhigaysa in duddada buuxisay heerarka la aqbali karo. Kadib xaaladda degdega ah, kormeer baaritaan ayaa dhici doonna.
- 6. HQS-5: Kormeerka Laba Sannadlaha ah** - Kormeerada la qorsheeyay waxaa laga yaabaa in dib loo dhigo.
- 7. HQS-6: Kormeerada Kumeelgaarka ag** - Home Forward guud ahaan ma u soo diri doonto kormeereyaal ku sameeya baaritaano duddooyinka la deggan yahay. Kireeyeyaasha waxay u isticmaali karaan foomka xaqiijinta iskooda ah in dayactirada la bogay.
- 8. HQS-7: Kormeerada Firaqada ee PBV** - Home Forward guud ahaan ma u soo diri doonto kormeereyaal ku sameeya kormeer baaritaan duddooyinka la deggan yahay. Kireeyeyaasha iskood ayay u xaqiijin karaan in duddada buuxisay heerarka la aqbali karo. Kadib marka xaaladda degdega ah dhammaato, kormeer ayaa la sameyn doonaa.
- 9. HQS-8: Heshiiska PBV HAP** - Kormeerada HQS ee ku Darida am Beddelida Duddooyinka - Home Forward guud ahaan ma u soo diri doonto kormeereyaal ku sameeya kormeer baaritaan duddooyinka la deggan yahay. Kireeyeyaasha iskood ayay u xaqiijin karaan in duddada buuxisay heerarka la aqbali karo. Kadib marka xaaladda degdega ah dhammaato, kormeer ayaa la sameyn doonaa.
- 10. HQS-9: Kormeerada HQS QC** - Home Forward uma soo diri doonto kormeereyaal ku sameeya kormeer baaritaan duddooyinka la deggan yahay.

11. **HQS-10: Booska iyo Ammaanka** - Home Forward uma baahan doonto inuu Degganaha ama Kaqeybqaataha u wareego duddo cabbir kale leh, haddii ay yihiin kuwo ka badan tirada dadka la oggol yahay inay ku noolaadaan duddada.
12. **HCV-1: Qorshe Maamul** - Sida caadiga ah, haddii Home Forward ay isbeddel weyn ku sameyso Qorshaha Maamul, waxay ku qasbantahay inay isbeddelka ugu soo bandhigo kulan dadweyne Guddiga Komishanka. Ka tanaasulidan darteed, waxaan sameyn karnaa isbeddelo degdeg ah iyadoo la marin geedi-socodka
13. **HCV-2: Xog-waranada Afka ah ee PHA** - Home Forward uma qaban doonto xog-warano fool-ka-fool ah, xogwarano kooxeed Kaqeybqaateyaasha Foojarka Dooqashada Guryaha cusub. Beddelkeeda, xog-waranada waxaa lagu qaban doonaa telefoonka ama habab kale oo elaktaroonig oo Kaqeybqaateyaasha waxay heli doonaan agabyo ay si madax-bannaan dib ugu eegaan.
14. **HCV-3: Muddada Foojarka** - Kordhinta Muddada - Haddii Kaqeybqaateyaashu ay awoodi waayaan inay helaan duddo ay u isticmaalaan foojarkooda cusub 120 maalmood gudahooda, waxay sii wadi doonaan inay helaan muddo kordhino si loo isticmaalo.
15. **HCV-4: Ansixinta PHA ee Kireysiga La Taageero** - Home Forward ayaa fulin karta heshiisyada HAP ee dhaafa muddo 60-maalmood ah. Waxaan la shaqeyn doonaa Kireeyeyaasha si loo saxiixo heshiisyada sida ugu dhakhsaha badan ee ugu macquulsan.
16. **HCV-5: Ka Maqnaanshaha Duddada** - Ilaa 12/31/2020, in laga maqnaado duddo in ka badan 180 maalmood oo isku xigta si toos ah looguma tixgelin doono kuxadgudubka barnaamijka.
17. **HCV-6: Joojinta Tooska ah ee Heshiiska HAP** - Ilaa 12/31/2020, Home Forward si toos ah uma joojin doonto kaalmada 180 maalmood kadib bixinta bilaa kabid dhaqaale.
18. **HCV-10: FUP** - Haatan, Home Forward waxay kaliya u adeegi kartaa dhalinta la koriyo kuwaasoo 24 jir ama ka yar ah ee haystaan foojarka FUP. Markay haystaan ka-dhaafitaankan, dhallinta la koriyo kuwaasoo 24 jir ama ka yar ah waxay u-qalmaan foojarada FUP.
19. **PH-4: ACOP (Diiwaangelinta iyo Siyaasadda Sii-socoshada Kireysiga)** - Sida caadiga ah, haddii Home Forward ay isbeddel weyn ku sameyso siyaasadda, waxay ku qasbantahay inay isbeddelka ugu soo bandhigto kulan dadweyne Guddiga Komishanka. Ka tanaasulidan darteed, waxaan sameyn karnaa isbeddelo degdeg ah iyadoo la marin geedi-socodka